## Ha Sugin; Jawaabo u Hel Su'aalahaaga isla Hadda!

Haddii aad u baahantahay maclumaad ku saabsan koritaanka caruurta iyo sida aad oga qayb qaadan karto waxbarashada iyo koritaanka canugaaga, booqo: **www.helpmegrowmn.org**.

Haddii aad ka walaacsantahay koritaanka canugaaga, la xiriir qolooyinka caruurta u sameeysa qiimeyn lacag-la'aan: kala xiriir dariiqa internetka oo booqo, **www.helpmegrowmn.org** Ama ka wac Telefoonka ah: **1-866-693-GROW (4769)**.





Booqo:
**www.helpmegrowmn.org**

Wac telefoonka:
**1-866-693-GROW (4769)**

Hay'adda caawisa koriimada caruurta waxay wada shaqayn leeyihiin Wasaaradaha Waxbarashada, Caafimaadka iyo tan Adeegyada Aadmiga ee Minnesota iyo baraamijyada ay ka fuliyaan degmooyinka kuwaas oo lagu soo xulo caruurta qabta dib u dhac xagga koritaanka iyo kuwa naafada ah si loogu xiro adeegyada/daryeelka ay u baahanyihiin.

Somali

# Ka Caawi Canuggaga inuu Kobco oo uu Koro.



## Warbixino la xiriira Koritaanka caruurta jirta 0 – 5 sano



## Caruurta Yaryar Qaarkood Waxay u Baahanyihiin Caawimaad Dheeraad ah si ay Wax u Bartaan una Koraan.

In kasta uu canug walba u koro si gaar u ah ama ka duwan caruurta kale, caruurta qaarkood waxaa la soo gudboonaada dib-u-dhac xagga koritaanka ah. Waxaa dhici karta in dib u dhacaas uu la xiriiro xaalado cafimaad darro ah oo uu canugga qabo.

### Maxay Muhiim u tahay in Amin hore Ilmahaaga aad Caawimo u Heshid?

Haddii uu canugga amin hore helo adeegyada uu u baahan yahay, natiijooyin wanaagsan ayaa la gaarayaa. Adeegyada tayada sare leh waxay hoos u dhigaan dhibaatooyinka la xiriira waxbarashada, hab dhaqanka iyo cafimaadka.

Haddii aad walwal ka qabtid koritaanka canuggaaga, oo aad uu maleynayso in uu caawimaad dheeraad ah u baahan yahay si uu wax u barto una koro, fadlan canugga gudbi/xawil isla manta.

### Gudbinta/Xawilaada Canugga Waa Fududaha

Qof walba ayaa soo gudbinkara canugga da'diisu tahay 0-5 sano jir, sida waalidka, qof qoyska ka mid ah, qof saxiib ah ama qof aqoonyahan ah oo qoyska la shaqeeya. Waxaa jira saddex siyaabood oo canugga loo xawili karo:

- Xagga shabakadda internetka **www.helpmegrowmn.org**.
- Xagga Taleefonka **1-866-693-GROW (4769)**. Waxaad codsan kartaa turjumaan haddii aad u baahato.
- Waxaad Wici kartaa xarunta iskuulada ee degmada aad degentihiin.



### Haddii Aad Calaamadahaan Mid ka Mid ah ku Aragtid canugga islamarkiiba Gudbi/Xawil:

- Hadaaq la'aan, far ku-fiiqid la'aan ama jir dhaqdhaqaajimo kale marka uu gaaro 12 bilood.
- Hal erey haddii uusan oran karin canugga jiro 16 bilood
- Hadal laba erey ka kooban haddii uusan isku xiri karin canugga jiro 24 bilood
- Haddii uu canugga lumiyo ama ilaawo ereyo iyo xirfado uu hore u bartay da'a kastaba ha jiree.

### Maxaa Dhaca Kadib Markii Canugga La Gudbiyo/Xawilo?

Iskoolka degmada ayaa qoyska lasoo xiriiraya lana qorsheynaya sidii canugga baaritaan ama qiimeyn loogu sameyn lahaa. Tani waxa lagu ogaanayaa in uu canuggu xaq u leeyahay daryeelka/adeegyada loogu talagalay ilmaha dhallaanka ah, kuwa socod baradka ah ama caruurta xanaanada dheeraadka ah ubaahan.

Caruurta xaqqa u yeelata in daryeel la siiyo, waxay daryeelka ku qaadan karaan guryahooda, rugaha daryeelka caruurta ama dugsigayada xanaanada. Adegyadaan waa lacag-la'aan lamana baarayo daqliga qoyska iyo sharciga ay wadanka ku jogaan.

Adeegyada la siinayo canugga waxay ku xirantahay baahida canugga si looga caawiyo xagga waxbarashada iyo koriimada.

Shaqaale ku takhasusay la shaqeynata caruurta yaryar iyo qoysaska ayaa qorsheeynaya adeegyada iyo taageerada ay u baahan yihiin.

**Adeegyada waxaa ka mid ah:**

- In si gaar ah wax loogu dhigo sida loo hadlana la baro iyo in la baro xirfado si uu canuggu wax u qabsan karo
- Siyaabaha qoysku uu guriga wax ugu bari karo canugga iyo
- In lagu xiro adeegyada iyo barnaamijyada ka socda bushada dhexdheeda.